7th SOMALI PROSECUTORS' CONFERENCE SPC 2025

مؤتمر السنوي السابع للنيابة الصومالية

# SHIRWEYNAHA 7AAD EE XEER ILAALIYEYAASHA SOOMAALIYEED

La-Dagaalanka **Maalgelinta** Iyo Ilaha Dhaqaalaha **Argagixisada**

Combating the Financing and Economic Sources of Terrorism

مكافحة تمويل ومصادر اقتصاد الإرهاب

Theme 2025

**Xafiiska Xeer ilaaliyaha Guud ee Qaranka** SOMALIA

Office of The Attorney General

# WAR-MURTIYEED

# WAR-MURTIYEEDKA SHIR SANNADEEDKA 7AAD EE XEER ILAALIYEYAASHA SOOMAALIYEED, MUQDISHO

Shirwaynaha 7aad ee Xeer Ilaaliyeyaasha Soomaaliyeed oo Sannadkan hal-ku-dhaggiisu yahay: “**LA-DAGAALANKA MAALGELINTA IYO ILAHA DHAQAALAHA ARGAGIXISADA**”, waxaa lagu qabtay Magaalada Muqdisho  gaar ahaan Hotel Jazeera, waxa uuna socday muddo 2 maalmood ah oo kala ah 5-6 da Bisha Feebaraayo ee Sannadka 2025.

Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo Xafiisyada Xeer-ilaalinta heer Dowlad Goboleed, waxa ay u si wada jir ah ugu mahadcelinayaan martida sharafta leh ee ka kala socday hay’adaha kala duwan ee dawladda iyo ka soo qaybgalayaasha.  Si gaar ah waxaa loogu mahadcelinayaa madaxda shirka ka soo qayb gashay ee kala ah Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Dalka, Wasiirka Wasaaraddaa Cadaaladda iyo Arrrimaha Dastuurka, Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga, Wasiiru-dowladaha Wasaraddda Cadaaladda iyo Arrimaha Dastuurka, Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Maaliyada, Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Warfaafinta, Lataliyaha Madaxweynaha ee Amniga Qaran, Guddoomiye ku-xigeenka Bangiga Dhexe, Guddoomiyaha Maxkamada Ciidamada Qalabkasida, Guddoomiyaha Maxkamadda Racfaanka Gobolka Banaadir, Guddoomiyaha Maxkamada Gobolka Banaadir, Taliyaha Hogaanka Baarista Dembiyada, Taliyaha Booliska ee Gobolka Banaadir, Agaasimaha Machadka Tababarka Garsoorka, Hay’adda Warbixinada Maaliyadda, Garyaqaanka Guud, Hay’adaha Bulshada

Rayidka ah, Ururka Qareenada Soomaaliyeed, Jaamacadaha Dalka, Wefdi ka socday Wasaaradda Cadaalaadda ee dalka Masar.

Shirka waxaa si rasmi ah u furay Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya. Waxaana shirka looga dooday Cilimi baaris ay ka mid yihiin:

1. Sooyaalka Argagixisada Soomaaliya.
2. Ilaha dhaqaalaha Argagixisada.
3. Kaalinta arbaahinta ee la-dagaalanka argagixisada.
4. La-dagaalanka maalgelinta argagixisada.
5. La-dagaalanka iyo xakamaynta hubka sharcidarada ah.

**Shirweynaha 7aad ee Xeer-Ilaaliyeyaasha Soomaaliyeed, waxaa ka soo baxay war-murtiyeed, waxaana ka mid ah qodobadbadiisa.**

1. Shirku wuxuu u mahadcelinayaa qabanqaabiyeyaasha iyo dhammaan ka qaybqaatayaasha shirka.
2. Shirku wuxuu taageerayaa dadaallada Xukuumadda iyo baaqii Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee la dagaallanka argagixisada, gaar ahaan maalgelinta argagixisada, wuxuuna boorrinayaa in la sii xoojiyo dadaalladaas.
3. Shirku wuxuu bogaadinayaa howlgalada naf-hurnimada leh ee ay fulinayaan ciidamada qaranka Soomaaliyeed, si dalka looga xoreeyo argagixisada.
4. Shirku wuxuu dhiirrigelinayaa kor u qaadista wacyigelinta bulshada ee la xiriirta saamaynta taban ee maalgelinta argagixisada iyo ka ganacsiga hubka sharci-darrada ah.
5. Shirku wuxuu hoosta ka xarriiqayaa in shacabka Soomaaliyeed ay yihiin dhibbanayaal argagixiso, wuxuuna ku baaqayaa in hay'adaha dowladda, gaar ahaan kuwa amniga, sharci fulinta,

booliska, iyo xeer-ilaalinta, ay xoojiyaan dadaallada ka dhanka ah argagixisada.

6. Shirku wuxuu bogaadinayaa wada shaqeynta joogtada ah iyo xiriirka adag ee ka dhexeeya Xafiiska Xeer-ilaaliyaha Guud ee Qaranka iyo hay'adaha baarista dalka, wuxuuna ku boorrinayaa in la joogteeyo dadaallada la dagaallanka maalgelinta argagixisada.
7. Shirku wuxuu adkaynayaa baahida loo qabo tayaynta hay'adaha baarista oo udub-dhexaad u ah la dagaallanka dambiyada..
8. Shirku wuxuu hoosta ka xarriiqayaa muhiimadda ay leedahay in la helo xabsiyo gaar ah oo loogu talagalay dadka lagu xukumay dambiyada argagixisada.
9. Shirku wuxuu ka walaacsan yahay miisaaniyad-yarida hay'adaha garsoorka, gaar ahaan xafiisyada xeer-ilaalinta heer federaal iyo dowlad-goboleed, wuxuuna ku talinayaa in hay'adaha fulinta ay si degdeg ah uga shaqeeyaan wax ka qabashada arrintaas
10. Shirku wuxuu bogaadinayaa doorka warbaahinta ee wacyigelinta bulshada iyo la dagaallanka fikradaha argagixisada.
11. Shirku waxa uu baraarijey Muhiimada uu u leeyahay Amniga Fikirku bedqabka bulshada iyo in laga ilaaliyo argagixisada in ay ku faafiyaan fikirkooda guracan bulshada dhexdeeda.
12. Gunnaanad, Shirku wuxuu aqoonsaday doorka Xafiiska Xeer-ilaalinta heer Federal iyo heer dowlad goboleed ku leeyihiin dowlad dhiska Soomaaliya iyo sida ay lagama maarmaan u tahay in la helo Xeer-ilaaliyeyaal ku qalabeysan aqoon, daacadnimo, karti iyo hufnaan.

**6 FEBRAAYO 2025**
**ALAA MAHAD LEH.**
**DHAMMAADKII WAR-MURTIYEEDKA.**

**----**

Xafiiska Xeer ilaaliyaha
Guud ee Qaranka SOMALIA
Office of The Attorney General

7th SOMALI PROSECUTORS' CONFERENCE SPC 2025
Shirweynaha 7aad ee Xeer
Ilaaliyaasha Soomaaliyeed.
مؤتمر السنوي السابع للنيابة الصومالية

Theme 2025

La-Dagaalanka **Maalgelinta**
Iyo Ilaha Dhaqaalaha **Argagixisada.**
Combating the Financing and Economic Sources of Terrorism
مكافحة تمويل ومصادر اقتصاد الإرهاب

5th/6th
Feb 2025

# HALKU-DHIGA SHIRKA

## " LA-DAGAALANKA MAALGELINTA IYO ILAHA DHAQAALAHA ARGAGIX-ISADA "

**(Combating the Financing and Economic Sources of Terrorism)**

**مكافحة تمويل ومصادر اقتصاد الإرهاب**

5-6 Feb 2025
Arboco iyo Khamiis
Hotel Jazeera
Mogadisho, Somalia